



STATE OF WASHINGTON

DEPARTMENT OF CHILDREN, YOUTH, AND FAMILIES

Specific Office

Date

Name and Mailing Address

KU: Waalidka(waalidiinta) Korsashada Ee La Filayo

Sharciga gobolka Washington ayaa wuxuu farayaa Waaxda Carruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska (DCYF) in ay siiso waalidiinta doonaysa in ay carruur korsadaan macluumaadka ku saabsan xaddidaadaha barnaamijka taageerada korsashada ugu yaraan lix bilood ka hor inta aan la soo gunaanadin hannaanka korsashada cunuga ay Waaxdu gacanta ku haysay. Sharciga wuxuu u baahan yahay in aad hesho macluumaadkan soo socda ee ku saabsan xaddidaadaha barnaamijka taageerada korsashada:

Lacag-bixinnada Khaashka Bil Kasta Ah

Sida waalid kasta, waalidiinta carruurta korsanaya waxay maaliyad ahaan mas'uul ka yihiin baahiyada carruurtooda. Barnaamijka wuxuu kabayaa kheyraadka waalidiinta iyo bulshada si uu ugu caawiyo daboolidda baahiyada caadiga ah iyo kuwa gaarka ah ee cunugga. Ilaa iyo inta ay le'eg tahay caawimaadda ayaa waxaa lagu go'aamiyaa wada-hadal iyo wada-xaajood dhexmara waalidiinta carruurta korsanaysa iyo hawlwadeennada Barnaamijka Taageerada Korsashada. Qaddarka caawimaada ee uu qoysku heli karo sida lacag-bixinta kaashka ah ee bil kasta la bixiyo waxaa lagu xaddidayaa qaddarka laga wada-xaajooday ee annu dhaafi karin xadka sharciga ah ee loogu talagalay lacag-bixinta masruufka taageerada korsashada ee uu dhigayo xeerka RCW 74.13A.047.

Lacag-bixinno Hal-Mar La Bixiyo

Barnaamijka Taageerada Korsashada wuxuu bixiyaa lacag duuduub ah ama lacag-bixin hal-mar la bixiyo marka cunugga uu leeyahay baahi xad-dhaaf ah oo u baahan in si degdeg ah wax looga qabto. Qaddarka halka mar la bixiyo waxaa lagu go'aamiyaa wada-hadal dhexmara waalidiinta carruurta korsanaysa iyo hawlwadeennada Barnaamijka Taageerada Korsashada. Lacag-bixinnada halka mar la bixiyo waa dhif iyo naadir. Tixgellinnada waa kuwo gaar ah.

Meelaynta Degaanka ama Daryeel Kooxeedka

Sharciga uma ogolaanayo DCYF in ay bixiso lacagta meelaynta degaanka ama daryeel kooxeedka cunugga aan gacanteeda ku jirin. Carruurta la korsaday waxay helaan adeegyo la mid ah, oo ay ku jiraan meelaynta daryeelka korsashada, ilaa xad la mid ah cunug kasta oo ka mid ah dadweynaha guud. Hawlwadeennada Barnaamijka Taageerada Korsashada ayaa u gudbin doona waalidiinta carruurta korsanaysa DCYF degaankooda si ay uga wada-hadlaan adeegyada la heli karo.

Helidda Adeegyada Caafimaadka Dhimirka

Taageerada Korsashada wuxuu bixiyaa caawimaad leh daaweyn shakhsiyeed. Daaweynta shakhsiyeed waxaa loola jeedaa daaweynta diiradda saaraysa baahiyada cunugga, hab-dhaqankiisa, iyo macaamilka uu la leeyahay qoyska.

Warqaddan waxaa dheer, in aad helayso xiriirka (link) loogu magacdaray “Su’aalaha iyo Jawaabaha Adeegyada Korsashada Ka-dib.” Buugyaraha waxaa laga heli karaa shaqaalaha bulshada ee korsashada, la-taliyaha taageerada korsashada, iyo mareegtadan:

<https://www.dcyf.wa.gov/services/adoption-support-program>

Carruurta la korsanaya waxaa ay helaan adeegyada kale ee caafimaadka dhimirka ah ee uu heli karo cunug kasta oo ka mid ah dadweynaha guud. Macluumaadka ayaa waxaa laga heli karaa bogga Caafimaadka Dhimirka Carruurta ee DSHS:

<https://www.dshs.wa.gov/mental-health-and-addiction-services>

Xaq-u-yeelashada adeegyada caafimaadka dhimirka, dabciga adeegyada, iyo maaliyadaha waxaa ku waajiba isbeddel. Si aad u ogaato adeegyada hadda la heli karo, kala xiriir la-taliyahaaga barnaamijka taageerada korsashada 1-800-562-5682. Xaaladaha uu qalalaasaha jiro, wac khadka 24-ka saac ee degaankaaga. Haddii ay jirto xaalad degdeg ah oo nolosha halis gelinaysa, wac 911.

Helitaanka Adeegyada Caafimaadka Dhimirka iyo Caawimaadda Maaliyadda

Qoysasku waxaa ay soo sheegaan in ay caqabado badan ay ka hortaagan yihiin in ay adeegyada caafimaadka dhimirka ay u helaan carruurtooda ha ahaadaan kuwo ay iyaggu dhaleen ama kuwa ay korsanayaan. Caqabadaha qaarkood waxaa ka mid ah kharashka adeegyada dhaafsiisan kheyraadka qoyska ee la heli karo; helitaanka bixiyeyaasha caafimaadka dhimirka ee meelaha qaarkood iyo la’aan bixiyayaal khibrad u leh wax-ka-qabashada arrimaha korsashada/daryeelka korsashada. Barnaamijka Taageerada Korsashada ayaa wuxuu bixiyaa maaliyadaha adeegyada caafimaadka dhimirka oo xaddidan. Kala hadal Maamulaha Barnaamijka Taageerada Korsashada ee gobolkaaga in hadda la heli karo maaliyadaha adeegyada caafimaadka dhimirka.

Annaga/anniga waxaan helnay dokumentigan waxaanna annaga/anniga heli karnaa buugyaraha Su’aalaha iyo Jawaabaha Adeegyada Korsashada Ka-dib.

SIXIIXA	TAARIKHDA	HALKAN KU QOR MACAGA
SIXIIXA	TAARIKHDA	HALKAN KU QOR MACAGA